

DARYEELKA CAAFIMAADKA

*Ololaha daryeelka caafimaadka ee bilaashka ah
oo gaadhay Bulshadi mudnayd*





04



ADEEGYADA IYO
HAWLAHA SAMAFAL
EE CAAFIMAADKA



05



HUBINTA
DHAQANGELINTA
HALBEEGYADA ISO



06



MASHAARIICDA
XOOGSI XALAAL AH



07



HAWLAHA
WAXBARASHADA



A.R.C

Address: Barbera Road - Hargeisa
Mobile: +252633278253
Phone: +252514333
E-Mail: somalia.office1@gmail.com
Website: www.arcsom.org

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO
HAYADDA GARGAARKA AFRICA
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED
IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (39) NOVEMBER 2024



جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society





XADHIG KA JARIDDA GAROOMADA CAGAARAN EE XARUNTA KUWEYTIGA



Xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa waxaa ka qabsoomay xaflad ciyaareed loogu damaashaadayey furitaanka garoonada cagaaran ee dhowaan xarunta laga hirgeliyey. Munasabab halkudheggeedu ahaa 'Jawi waxbarasho oo joogto loo cusboonaysiiyo' waxaa ka soo qaybgalay tiro ka mid ah haldoorka iyo masuuliyiinta Somaliland, iyo sida oo kale madaxda sare ee hay'adda Gargaarka Afrika.

Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi, maamulaha guud ee ARC ayaa sheegay in maalintani ay dareen gaar ah oo farxadeed u leedahay, waxa aanu bogaadiyey masuuliyiinta hay'adda ee hawshan qurxinta garoomada qaybta ka ahaa. Waxa kale oo uu hambalyo u diray masuuliyiinta barnaamijka waxbarashada ee ARC oo ay ugu horreeyaan madaxda qaybta hoyga ardayda iyo dugsiyada ee Kuweytiga oo uu ku ammaanay in ay abuureen deegaan waxbarasho oo ku dayasho mudan, qorshahan ciyaaraha lagu xoojinayaana uu yahay tallaabo kale oo ay ku sii dardargelinayaan waxbarashada iyo barbaarinta.

Xildhibaan ka tirsan baarlamaanka Somaliland oo ka mid ahaa martida sharafta munaasabadda ayaa hadallo bogaadin iyo dhiirrigelin u badan ka jeediyey munaasabadda. Xildhibaan Siciid Maxamed (Sokeeye) oo ka mid ahaa ayaa ammaanay kaalinta ay xarunta Kuweytigu ku leedahay koboca, iyo horumarinta waxbarashada dalka. Isaga oo ku tilmaamay in ay tahay xarun dhammaystiran maadaama oo ay koobsatay



waxbarashada, iyo xirfadaha shaqada iyo farsamada gacanta.

Xildhibaan Barkhad Batuun ayaa isaguna ku dheeraaday Bogaadinta kaalinta qiimaha leh ee ay Xarunta Kuweytigu ku leedahay dalka, isaga oo ku tilmaamay in ay tahay meel aamin ah, sharaf iyo xurmana ku dhex leh bulshada oo soo saarta arday si qurux badan loo barbaariyey.

Munaasabadda waxa kale oo lagu soo bandhigay ciyaaro ay ka mid yihiin kubadda cagta ah, ciyaaraha qaalamo-rogadka, laacdanka iyo Taekwondo, sida oo kale laba kooxood oo ka mid ah naadiyada kubadda cagta ayaa mid ka mid ah garoonnada cusub ku yeeshay kulan ciyaareed aad u xiise badnaa. Koobka tartanka kubada cagta, abaalmarinno iyo billado kala duwan ayaa ciyaaryahannadii kala duwanaa la guddoonsiiyey dhammaadkii ciyaarta.

Munaasabaddan furitaanka garoomada, waxa kale oo ka soo qaybgalay masuuliyiinta sare ee ARC, kuwaas oo uu ka mid ahaa ku-xigeenka maamulaha guud ee ARC, ahna madaxa mashaariicda iyo Barnaamijyada mudane Xuseen Mutawalli.

Xarumaha Kuweytigu waxa ay ka mid yihiin Barnaamijka waxbarashada ee ay ARC ka waddo deegaannada kala duwan ee Soomaalida ee Geeska Afrika, kaas oo ay maalgeliso hay'adda ALRAXMA Kuweyt.



قوافل الشفاء

1445 هـ - 2024 م

تبرع

محسنون دولة الكويت

إشراف

DARYEELKA CAAFIMAADKA

**Ololaha daryeelka caafimaadka ee bilaashka ah
oo gaadhay Bulshadi mudnayd**

Olole samafal oo mar kale rejada iyo dhoolla caddaynta u soo celiyey qaybo ka mid ah qoysaska danyarta ah ee magaalada Hargeysa, ayaa ay hay'adda ARC adeegyo caafimaad oo lacag la'aan ah ku gaadhsiisay qaybo ka mid ah deegaannada ka go'an magaalada ee duleedka Hargeysa.

Saddex kolonyo oo isugu jira dhakhaatiir takhasus ah ayaa u kala baxay deegaannadaas, waxa aanay gaadhsiiyeen daryeel caafimaad oo ay wadartiisa ka faa'idaysteen bukaan tiradoodu dhan tahay 741.

Dhakhaatiirta oo si gaar ah xoogga u saaray la dagaalanka xumadda Dengue oo muddooyinkii u dambeeyey dalka ku soo badanaysa, ayaa bukaankan siiyey wacyigelin la xidhiidha caafimaadka dadweynaha iyo gaar ahaan xumadda Dengue, sida oo kalana u fidiyey adeegyo ay ka mid ahaayeen shaybaadhis, la talin caafimaad, qalliino fudud, dawooyin ay siiyeen bukaanka u baahan, iyaga oo xaaladaha culus u gudbiyey cisbitaalka 'Hargeisa International' oo ka mid ah Barnaamijyada caafimaadka ee ay ARC ka

fuliso Geeska Afrika.

Dr. Axmed Muctamad, maamulaha guud ee Cisbitaalka 'International - HIH' ayaa sheegay in hindisahan kaalmada caafimaadku uu yahay farriin rejo iyo farxad lagu gelinayo bulshada qaybaheeda aan dhaqaale ahaan awoodin in ay iska bixiyaan kharashaadka caafimaad, kuwa wacyigoodu hooseeyo ee aan goobaha caafimaadka tegin iyo kuwa Deggen deegaannada ka fog rugaha caafimaadka ee aanay duruufuhu u saamaxayn in ay gaadhaan.

Ololahan caafimaad waxaa fulisay hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) oo kaashanaysay cisbitaalka, waxaana maalgelinta iyo hubinta midhadhalkiisa leh hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.

Barnaamijka ololaha adeegga caafimaad ee lacag la'aanta ah waxaa sannad kasta ka faa'idaysta boqollaal ka mid ah bulshooyinka Soomaaliyeed ee ku dhaqan gobalka Geeska Afrika, waxa aanu qayb ka yahay mashaariic bani aadamnimo oo ay dalka ka fuliso ARC oo gacan ka helaya hay'adda ALRAXMA.

Guddida Tayo-Dhowrka Ee ARC Oo Baadhis Sameysay Shaqada Hay'adda



Guddi loo xilsaaray hubinta tayada shaqo ee qaybaha iyo waaxyaha kala duwan ee ARC, ayaa si guul leh u dhammaystiray hawl baadhis iyo hubin ah oo maalmihii u dambeeyey ay wadeen.

Hawsha guddida Tayo-dhorka ayaa ay ujeeddadeedu ahayd in la xaqiijiyo in ARC ay u hoggaansantahay shuruudaha, iyo halbeegyada caalamiga ah ee hay'adda caalamiga ah ee dhowrista halbeegyada sare ee tayada (ISO - International Organization for Standardization). Guddidu intii ay shaqadan wadeen waxa ay hoosta ka xariiqeen wixii dhaliilo ah ee ay kala kulmeen qaybaha kala duwan, waxa aanay u soo bandhigeen fursadaha sixitaanka iyo hannaanka ugu dhaqsaha badan ee mustaqbalka lagu horumarin karo tayada, si loo ilaaliyo heerka tayo wanaagga ee ay ARC sannadkii hore ee 2023 ku mutaysatay shahaadada caalamiga ah ee tayada 'ISO 9001:2015'.

Guddida Tayo-dhowrist waxa ay shaqadan ka fuliyeen dhammaan qaybaha kala duwan ee ARC ay ku leedahay dalka, waxa aanay ujeeddada ugu mudani ahayd in lagu kalsoonaan karo joogtaynta shaqada wanaagsan iyo ballaadhinta raadadka togan ee ay ku leedahay bulshada loo adeegayo.

Dr. Mudahar Xuseen, maamule ku xigeenka hay'adda ARC ee shaqada iyo hawlgelinta ayaa sheegay in guddida hubinta iyo baadhista tayadu ay xoogga saartay dib u eegista tallaabooyinka iyo hawlaha shaqo ee ay qabtaan, iyaga oo si gaar ah hoosta uga xariiqayey meelaha xoojinta ama wax ka beddelka u baahan.

Warbixin ay guddida Tayo-dhowrku soo saartay baadhista kaddib waxa ay ku muujisay rejada weyn ee ay ka qabto in baadhista iyo dabagalka ay sameeyeen uu qayb ka qaadan doono kor u qaadista iyo dardargelinta guud ahaan shaqo wanaagga hay'adda.



MASHAARIICDA ARRIMAHA BULSHADA



ARC Ayaa Ganacsiyo Yaryar U Furtay Qoysas Danyar Ah



Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) oo gacan ka haysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt ayaa qoysas danyar ah u furtay meherado ganacsi oo isugu jira booshariyo iyo bacadlayaasha dharka lagu iibiyo. Shan qoys oo ku dhaqan magaalooyinka Boorama iyo Muqdisho ayaa la gaadhsiiyey gaadhi gacanno u diyaarsan iibka Khudaarta iyo sida oo kale marfish bacadleh oo guurguuri kara. Meheradan ayaa qalabka ka sokoow, dhammaantood waxaa la socday badeecadaha iibka ee bilowga raasamaalka u noqonayaa meheradda.

Mashruucani waxa uu qayb ka yahay

Barnaamijka horumarka waara oo ay hay'adda ARC ka fuliso deegannada kala duwan ee Soomaalida. Waxa aanay ujeedadiisu tahay in dhalinyarada iyo guud ahaan dadka hal-abuurka leh loo aburo ilo dakhli oo ay ka dabbaran noloshooda iyo nolosha cidda ku tiirsan. Si loo yareeyo ku tiirsanaanta kaalmada dibadda, isla markaana ay uga qaybqaataan koboca guud ee dhaqaalaha bulshada.

Barnaamijkan oo lagu magacaabo 'Xoogsi Xalaal ah' waxaa sannad kasta ka faa'idaysta boqollaal ka mid ah qoysaska danyarta ah ee deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.



WAXBARASHADA



Xarumaha xiftiga Qur'aanka ee ARC maamusho oo ka qaybgalay tartan Caalamiya



Xarumaha Xiftiga Qur'aanka Kariimka ah ee Kuweytiga ayaa ka qaybgalay tartanka caalamiga ah ee Qur'aanka Kariimka ee sannadkan 2024.

Tartankan oo ay agaasintu hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt, waxaa ka qaybgala tartamayaal ka socda dalalka kala duwan ee ay ka shaqeeyaan mashaariicda ay maalgeliso ALRAXMA. Waxa aanay sannadkan tiradoodu ahayd 100 tartame oo isugu jira wiilal iyo gabdho ay soo sharraxeen xarumaha xiftiga Qur'aanka ee ka shaqeeya deegaannada iyo dalalka kala duwan oo mid kastaa soo diray toban illaa shan iyo toban xaafidu Qur'aan.

Waxa ay ku tartamayeen qaybaha kala duwan oo ahaa Labajus, Shan Jus, Toban Jus, Labaatan Jus iyo Soddonka Jus, taas ayaana sabab u noqotay in fursaddan ay ka faa'idaystaan dad badan oo ku hawlan barashada iyo xafidista Qur'aanka Kariimka ah.

Tartankani waxa uu qayb ka yahay mashaariicda waxbarashada ee samafalka ah,

kuwaas oo lagu xoojinayo kaalinta barashada Shareecada iyo in ardayga lagu barbaariyo anshaxa wanaagsan ee Islaamka, si loo helo jiil ka dhisan dhinacyada kala duwan ee diinteenna iyo culuumta adduun ee kale.

Tartankan oo qaybtiisa hore ay ahayd isreebreeb ay ka wada qaybqaateen ardayda ayaa ugu dambayn la soo doortay saddexda tartame ee ugu sarreeyey xarun kasta oo ka mid ah xarumaha xiftiga ee tartanka galay, waxaana loo qabtay munaasabad lagu maamuusayo.

Tartamayaasha ka socotay deegaannada kala duwan ee Soomaalida ayaa sanadkan wacdarogaar ah ka muujiyey tartankan oo ay bogaadin gaar ah ku heleen diyaarsanaanta xiftigooda iyo dhismaha ruuxdooda. ARC ayaa gobalka ka wada dadaallo xooggan oo kor loogu qaadayo barashada iyo xafidista Qur'aanka Kariimka ah, iyada oo gacan ka helaysa hay'adaha dawlada ee ay khusayso oo iskaashi kala sameeya fududaynta hawshan, iyo hay'adda ALRAXMA Kuweyt oo iyadu maalgelisa.





@africanreliefco



Address: Barbera Road - Hargisa

Mobile: +252633278253

Phone: +252514333

E-Mail: somalia office1@gmail.com

Website: www.arcsom.org

